Notice of extension of suspension

Using the telephone interpreter service to contact the school

# Ogeysiiska kordhinta dugsi ka joojinta

## Isticmaalida adeega turjumaanka taleefanka si aad dugsiga ula xiriirto

Magaca ardayga
Name of student

Gacaliye xannaaneeye/waalid

Warqada ku lifaaqan ayaa sharxaysa faahfaahinta kordhinta Ogeysiiska dugsi ka joojinta ee aan siiyey ilmahaaga sida waafaqsan nidaamyada Cayrinta iyo Dugsi ka Joojinta iyo Qorshaha Dabeecada Ardayda ee Wasaaradda Waxbarashada NSW.

Warqadu waxay ku siinaysaa taariikhda cusub ee dhammaadka dugsi ka joojinta waxayna kugu martiqaadaysaa inaad ka soo qaybgasho kulanka natiijada ee lagaga wada hadlayo dugsi ka joojinta iyo qoyshaynta taageerada marka ilmahaagu uu ku noqdo dugsiga. Marka dugsigu kula soo xiriiro, fadlan na soo ogeysii haddii aad u baahan tahay turjubaan inuu joogo kulanka waana kuu balaminaynaa. Haddii aad dhib kala kulanto Fahamka warqada ku lifaaqan fadlan la xiriir dugsiga si aan u sharaxno.

Haddii aad u baahan tahay caawimaada turjubaan markaad la xiriiraysid dugsiga, fadlan wac 131 450 oo weydiiso turjubaan luuqadaada ah. U sheeg xiriiriyuhu inuu kuu waco lambarkaad dooneysid inaad wacdo, waxayna khadka soo gelin doonaan turjubaan kaa caawiya wada hadalka. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.

Magaca Maamulaha
Name of Principal

Lambarka taleefanka Maamulaha
Principal’s phone number